


Mudnaanta ODE IYO ELD ee Tijaabada Deyrta 2023



Waxda Waxbarashada Oregon (ODE) iyo Qaybta Waxbarashada Hore ee Oregon (ELD) waxay kala shaqaynayaan bulshooyinka gobolka oo dhan si ay dibu habayn ugu sameeyaan Qiimaynta Xadaanada Carruurta ee Oregon (OKA). Deyrta 2022, Miiska Jikada Oregon (OKT) waxay marti galisay wada sheekaysiga bulshada ee qoysaska iyo bixiyayaasha ka qaybqaatay “Waraysiyada Qoyska,” hab tijaabo ah oo lagu taageerayo u guddida ardayda ee xadaanada carruurta.

Booqo oregonskitchentable.org/results/early-learning-transition-check-ins si aad ula degto soo-koobida fulinta ee OKT iyo warbixinta oo dhan.

Warbixinta waxaa lala wadaagay guddiga la-talinta mashruuca si ay u eegaan oo ay u bixiyaan jawaab celin. Jadwalka hoose waxa uu bixinayaa soo koobidda talooyinka OKT iyo talooyinka guddiga la-talinta. Iyada oo ku saleysan macluumaadkan, ODE iyo ELD waxay diiradda saari doonaan mudnaanta soo socota ee tijaabada xilliga dayrta 2023:

- Hubinta in wakhti ku haboon lala xidhiidho barayaasha iyo qoysaska.
- Gelinta su’aalaha ku saabsan daryeelka xadaanada carruurta kahor, barnaamijyada, iyo adeegyada qoraal.
- Siinta fursadaha la socodka qoysaska.

Mudnaantan waxa lagu soo xulay iyada oo lagu salaynayo sida ay muhiimka u tahay talaabooyinka waxqabad ee guusha tijaabada.

Waraysiyada Qoyska: Talo Soo Jeedinta Guddiga

| Talooyinka OKT | Yoolka Mashruuca | Talaabooyinka Waxqabad ee Suurtogalka ah |
|--|--|--|
| *Hubi wakhtiga xidhiidhka ku haboon ee macalimiinta iyo qoysaska. | Horumari wadaagista macluumaadka ee qoysaska iyo barayaasha. | <ul style="list-style-type: none">• Sii farriimo waqtiyeysan, cad, fudud, oo dhaqan ahaan ka tarjumaya.• Hubi in barayaasha iyo shaqaalaha waxbarashada hore ay haystaan macluumaadka muhiimka ah si ay ula xidhiidhan shaqaalaha dugsiga iyo qoysaska horraanta gu’ga.• La wadaag ujeedada waraysiga qoyska, su’aalaha, iyo sida xogta loo ururin doono oo loo isticmaali doono. Sii tusaalooyin gaar ah oo ku saabsan sida xogta loo isticmaali doono.• Isticmaal qalab isgaarsiineed oo kala duwan (qof ahaan, muuqaal, taleefan, iwm.) si loo kordhiyo wacyiga. |
| | Si cad u sheeg yoolalka iyo ujeedada wareysiga. | <ul style="list-style-type: none">• Sii hanuunin cad oo dhaqan ahaan ka jawaabaya ujeedada, habka, iyo yoolalka waraysiga.• Abuur agab muuqaal iyo maqal ah (tusaale, waraysi tababar) oo ku qoran luqado kala duwan si loogu isticmaalo tababarka iyo hanuuninta si loo kordhiyo helitaanka.• Wargeli bixiyayaasha waxbarashada hore iyo habka wacyigelintooda iyo in la taageero qoysaska ku jira xilliga kala wareegga.• Ogaysii qoysaska in ka qaybqaadashada tijaabada ay tahay ikhtiyaari. |

| Talooyinka OKT | Yoolka Mashruuca | Talaabooyinka Waxqabad ee Suurtogalka ah |
|---|--|---|
| <p>* Geli su'aalo ku saabsan daryeelka xadaanada carruurta kahor, barnaamijyada, iyo adeegyada qoraal.</p> | <p>Beddel sharraxaadda iyo luqadda waraysiga si aad u kordhiso fahamka qoyska iyo daryeel bixiyaha iyo horumarinta waayo-aragnimada.</p> | <ul style="list-style-type: none"> • U sharraax ujeeddada su'aal kasta qoysaska iyo barayaasha. • Ku beddel "barnaamijyada" "waayo-aragnimada" mid ka mid ah su'aalaha si loogu akhriyo, "Waa maxay waayo-aragnimada barnaamijyada iyo/ama adeegyada ilmahaagu helay ama ka qaybqaatay si looga caawiyo inay wax bartaan oo ay koraan? Tusaalooyinka qaar ee waayo-aragnimada laga yaabo in ilmahaagu ka qaybqaatay waa..." Ku dar tusaalayaal barnaamijyo iyo adeegyo gaar ah oo su'aasha lagaga hadlayo. |
| <p>* Sii fursadaha la socodka qoysaska.</p> | <p>Hubi in xogta la ururiyay loo isticmaalo sidii loogu talagalay, oo loo wadaago si waxtar leh iyo waqti ku habboon.</p> | <ul style="list-style-type: none"> • Kahortag si xun u isticmaalka xogta lagu ururiyay Wareysiyada Qoyska. • La wadaag xogta iyo natiijooyinka qoysaska iyo barayaasha. • Noqo qof u daah-furan qoysaska, barayaasha, iyo dadweynaha guud. La wadaag sida xogtu ugu wargelin doonto maalgelinta iyo go'aamada barnaamijka. • Ku dhiirigeli dugsiyada inay ku xidhmaan qoysaska waraysiyada kadib. Soo jeedi waxqabadyo ka-qaybgal oo socda oo macno leh si loo dhiso dareenka lahaanshaha iyo bulshada. |
| <p>Xooji wacyigelinta gaarka ah ee dhaqan ahaan qoysaska.</p> | <p>ODE iyo ELD si ay u horumariyaan wacyigelinta iyo xidhiidhka qoysaska.</p> | <ul style="list-style-type: none"> • U samee agab daabacan iyo kuwo dhijitaal ah oo loogu talagalay qoysaska (muuqaalo, calaamado, boodhadh, iwm.). • Abaabul dadaallada wacyigelinta bulshada si loogu xiro qoysaska shaqaalaha bulshada ee la aamini karo si ay u caawiyaan kordhinta wacyiga. |
| <p>Ku xooji isku xirnaanta bulshada wada sheekaysiga bulshada.</p> | <p>Ku dhiirigeli wada sheekaysiga iyo dhisitaanka xidhiidhka ka dhexeeya barayaasha iyo qoysaska inay sii socdaan waraysiga kadib. Hubi in dadaalladani ay yihiin kuwo qoyska iyo degmadu ay wadaan.</p> | <ul style="list-style-type: none"> • La shaqee shaqaalaha gobolka si ay u taageeraan oo ay u wargeliyaan dadaallada ka-qaybgalka qoyska. • Sii maalgelin dheeraad ah, oo dabacsan oo loogu talagalay barayaasha si ay u taageeraan ka qaybgalka qoyska waraysiga kadib. • Ku dhis wakhtiga xidhiidh dhisidda jadwallada dugsiyada dhexdiisa. |

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Hubinta Kala-wareegga Waxbarashada Hore: Ka Qayb-qaadashada Iskaashiga Bulshada, booqo oregonearlylearning.com/PreKCheckin.

Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, fadlan iimayl u dir PreKCheckin@ode.oregon.gov.

